# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:22 AM** | **HANSARD No.26/3** | **Kal-fadhiga 26aad**

**Fadhiyadii 10 aad ,11aad** | ***07-08/December/2014***

## Dooda Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duur-joogta oo socotey 2 maalmood kana qeyb-qaateen 10 Mudane.

**Gudoomiye: - Md. Dr. Cali Yuusuf Axmed,** Waxaynu maanta u balan saneyna dooda Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duur-joogta oo ah Xeer muhiima, Markaa Mudanayaasha ka qeyb-qaadanaya ha is-qoraan Waxaana ku soo dhoweynayaa dooda Mudanayaasha.

1. **Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Awxoog):-** Gudidda Deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah ee Xeerkan soo diyaarisey aad baan u bogaadinayaa inkastoo xildhibaan kaliya uu ka joogo iyadoo ay aheyd inay madaama xeerkan iyagu ugu horeyn daneynayaan in la ansixiyo inay fadhigan joogaan, anigu waxaan ka tirsanahay kooxda Xildhibaanda la yidhaahdo Green Caucus ee Xeerkan markii hore soo diyaarisey ee researchka ku soo sameeyay, markaa xeerkan intiisa badani waa wanaagsan yahay, meel-meelo yar oo aan badneyn ayaan ka taabanayaa.

Waxaan odhan lahaa hawlihii deegaanka ee Wasaarada Deegaanka ay aheyd inay gacanta ku hayso waxaa ku haysta dhowr Wasaaradood, waxaan odhan lahaa kala xadeyntii shaqada Hay'addaha Dawlada ha la sameeyo.

**Qodobka 3aad F/5aad** *"Waa in ay samaysaa barnaamijyo (mashaariic) ku saabsan dhiraynta oo ay ka qayb galayaan shakhsiyaad, bulsho weynta iyo ururadda danaynaya in ay beeraan geedo iyo caws"* arrinkaasi wuu wanaagsan yahay balse waynu garaneynaa dawladii Siyaas bare waxaa la isku amrijirey in qofkasta gurigiisa hortiisa geed ka beero, iminka anigu waxaan xaafada la iga soo doortey ee Degmada Gacan-libaax maalin dhoweyd guri saddex dabaq ah gabadh baa istidhi dhir ku beer, beeristii markey bilowday dawldii hoose oo askar wadata ayaa timi ma qodeysid intay yidhaahdeen ayay gabadhii dukhaan dukhiyeen, waxaana laga aasey gododkii ay qodatey, arrinkaasi waxaa soo faro-galiyay Wasaaradii Deegaanka iyo Dawladii Hoose, hadii ay leeyihiin wadaad ku soo dhowaatey waxay

aheyd inay yidhaahdaan dib u dhig, laakiin halkii ay dhirta ka dhiirigalin lahaayeen waxay ka doonayaan in la mustafeeyo oo iyagii wax laga siiyo si geedkii loo qodo.

Markaa Waxaan odhan lahaaa Dawlada hoose iyo Wasaarada Arrimaha Guduhu waa inay dhiirigaliyaan Beerista oo dadka ku amra in qof walba gurigiisa geed ama laba geed ku beero, waayo waxaynu ognahey faa'idada dhirtu u leedahay deegaanka, pollutionka iyo dikhowga waxaa ka dawo ah dhirta.

**F/7[aad]** ee isla qodobkaa waxaa ku qoran Wasaaradu waa *inay "Abuurtaa oo ay maareysaa Seeroyinka"* bal yaa ka damiinanaya Wasaaradii Xanaanada Xoolaha oo iyadu iminka wada inay sameyso Seerooyin waxaana Awoodaas leh Wasaarada Deegaanka, Markaa Wasaarada Xanaanada Xoolaha waa inay Wasaarada Deegaanka iyo dhirta faraha uga qaadaan hawlahooda.

Inagoo Xeer-dejintii ah hadeynaan Wasaaradaha u kala sameyn xad waxay isku sameynayaan inay awoodihii isku qabsadaan, wasaaradii Deegaanku iminka way dedaaleysaa, waxaan ogahay Wadankeesa waxaa lagu soo qaadey weerar cir iyo dhul ah oo waxaa meel walba maraya dad sita sanaadiiq lagu gurayo duur-joogtii, waxayna ka lib heystaan Wasiirada ugu awooda waaweyn Xukuumada oo iyagu garab ku siinaya, markaa waxaan leeyahay Duur-joogtu waa inay ku ekaataa Wasaarada Deegaanka, wax hadiyad la yidhaahdo oo duur-joogta loo bixin karaana waa inaaney jirin, waayo duur-joogtii aad bay u badneyd barigii hore, maantana mid mid baad arkeysaa oo way sii dhamaanayaan.

Wasaarada Deegaanku way ku mahadsantahay inay joojisey dhuxushii, hase yeeshee maxay ku badaleen, maanta dhuxushii waxay mareysaa $15, waliba waxaa jira sida Xildhibaan Baar sheegtey in meelaha qaar Kiishka Sonkorta ah iyo Kiishka Dhuxusha la isk badasho oo ay isku qiimo yihiin, dadkii way dhiban yihiin, xukuumadu dhuxusha inay joojiso way ku mahadsantahay laakiin alternative may keenin, Wasiirka Maaliyadu wuxuu maalintii dhoweyd inoo sheegay in Cashuurtii laga joojiyay shooladihii gaasta, Markaa waxaan leenahay Xukuumadu iyadu ha keenot ama contract ha ku bixisee dadkii ay dhiban yihiin oo waxaa haysata iminka Caasimada Biyo la'aan baahsan iyo waxay wax ku karsadaanba, dhuxusha in la joojiyo uun maahee waa in la keeno wixii lagu badali lahaa, markaa waxaan ku talin lahaa waa in la keeno wax lagu badalo.

2. **Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne):-** Gudoomiyaha iyo Mudanayaasha waan salaamayaa, waxaan anigu ka hadlayaa had iyo jeer markaad dooneyso inaad arrin sameyso way kala horeeyaan arrimuhu, tusaale, hadaad maanta shirkad abuureyso marka ugu horeysa waa inaad qorshe sameysaa, dabadeed financialkii doontaa, dabadeedna Human resourcekii wax

wadi lahaa diyaarisaa, Xildhibaankii iga horeeyay wuxuu sheegay in hadii dhuxushii la joojiyay waa in badiil la keeno si aan dhirtaa loo goynin ileyn dhuxushu dhirtii bay ka imaneysaaye, anagu Gudi dhaqaale ahaan markii Wasiirka Maaliyadu halkan ka sheegay Cashuur dhaafka waanu u yeedhnay qoladan gaasta keenta oo wareysi baanu ka qaadney sida ay badal u sameynayaan arrintaa warbixinta aanu bixin doono ayaan ku soo dari-doonaa insha'alaah, badiilna way keeneen iyaga iyo xukuumadu.

Gudoomiye, Markaan u soo noqdo Xeerkan aniga waxay iila eegtahey duur-joog baynu ka hadleynaa, duur-joogta marka hore waxaa la siiyaa meel ku noolaadaan, anigu zeylac ilaa laascaanood waan marey xagana ilaa gar-adag baan tagey ilaa ceergaabo, dhulkii waa oodanyahay oo dad baa ood-tey, ninwaliba meel dhan buu oodmariay, hadii cid ugu tagtona qori buu soo qaadanayaa, aniga waxay ila tahay hadaad eegto east Africa ama Tansania ama dalalka leh meelaha loo dalxiiska tago dee dhul ay leeyihiin baa loo sameeyay oo laga xidhay dadkii kale ee leyn lahaa, markaa waxa weeye hadii meel ay ku hoydaan aaney haysan duur-joog ma heleysid.

Markaa Gudoomiye anigu waxaan leeyahay Xeerkan marka ugu horeysa:-

- **waa in seeraha la removegareeyo oo uu noqdaa Go'aan Gole oo la qaado wixii seero iyo oodo la sameystay dalka oo dhan markaa ayay dhirtiina baxaysaa duur-joogtiina way imaneysaa markaa**, laakiin iminksa sidey tahay dadka iyo duur-joogtu meel kuma wada noolaan karaan, waa in mid cararaa, anigu waxaan garanayaa iyadoo dadka ay duur-joogtu ka badan tahay boqol jeer, waxaana eryay maanta markii meel walba tuulo laga sameeyay oo meel walba xagaaf laga sameeyay, iminka meel walba la ootey.

- Hawsha Wasaaradaha inay offer lap sameyneyso iyana waxaan ku raacsanhey Xildhibaankii iga horeeyay, Wasiirka Deegaanka, Wasiikra Beeraha, Wasiirka Xanaanada Xoolaha iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha oo isna soo galaya, Markaa waxay ila tahay inay afartoodaasi intey isu yimaadaan kala-xadeystaan Shaqadooda oo mid waliba halka uu wax ka qabanayo iyo sida uu wax u qabanayo cadeeyaan, waayo inagu ma soo saari karno Wasiir hebel baa ceynkaa sameynaya, barita la isu imanayaa oo hadana la isqabasanayaa, inaguna ma gali karno, dabadeedna waa in ad hoc committee loo qeybiyaa afarta Wasaaradooda soo kala saara, ama Gudidda Xeerkan soo sameysayba ha loo saaree.

Xeerku waa Xeer wanaagsan, Gudiddii soo abaabusheyna aad baan ugu mahadnaqayaa, markaa anigu waxaan leeyahey Gudoomiye, ma sameyn karno Xeer aynaan u heyn meeshii duur-joogtu ku noolaan laheyd, waa in seerayaal la abuuro, waa in la removegareeyo waxan oo ood la iska oodtey, dabadeedna la cadeeyo meesha duur-joogta loogu talo-galey iyo meesha Seeraha laga dhigayoba, iminka Yurub iyo north America dadkan xoolaha dhaqda, waxa weey beerta marka la sameeyo gees baa la beerayaa sanadka, geesta kale sanadkaa way banaanaaneysaa, ilaa jig-jiga oo aan tagey xabad deero ah baan arkey.

**Markaa waxaan Soo jeedinayaa:-**

- Waa la baneeyo meelaha la iska ootey oo Xeerkan lagu daro, isla markaana waa in Duur-joogta iyo Seeraha meelo loo qoondeeyaa.

**Gudoomiye Dr. Cali Yuusuf:-** Xeerka kolkaad akhrido waxaa ku jira waxyaabaha uu xildhibaanku sheegay sida seeraha, waxaa ku jira meelaha duur-joogta lagu ilaalinayo, waxaa ku jira waddooyinkii u dhaxaynayay meelaha dadku ood-oodtey, markaa waxaas oo dhan xataa meesha tuulo laga dhigayo ama ceel laga qodayo way jiraan Xeerkaan, waxaa loo baahan yahay inaad si fiican u akhridaan, waana talo-wanaagsan.

3. **Md. Cali Maxamed Aadan (Cali Barre):-** ASC, Gudoomiye iyo Xildhibaanada Sharafta leh Salaanta Islaamka ka dib, waxaynu ka hadleynaa Xeerkan ina horyaala, sida Dastuurkeena JSL uu tilmaamayo **Qodobka 12^aad^ F/4^aad^** wuxuu sheegayaa in dawlada dhexe masuul ka tahey ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah, kuna waajibiyay inay qaado talaabo kasta oo ku haboon si looga faa'ideysto kheyraadkaa, **Qodobka 18^aad^** isna wuxuu sheegayaa in dawladu mudnaanta kowaad siineyso ilaalinta iyo daryeelka deegaanka.

Waxaa kale oo jira Xeer hore u dhaqan-galey oo ka hadlaya Xaalufka iyo nabaad-guurka sida loo ilaalin lahaa oo la ansixiyay oo madaxweynuhu saxiixay oo Wasaaradu ku shaqeyso oo kan shan jeer ka weyn, labada qodob ee dastuurka markaan raaco, waxbaa had iyo jeer la isku khaldaa dawladu wa'ayo?, dawladu waa saddex waaxood ee Dastuurku tilmaamey ee Qaranka JSL ka kooban tahay oo kala ah Xeer-dejinta, Xukuumda iyo Garsoorka, dawlada marka la leeyay saddexdaa waaxood mid walba dhinac buu ka soo galayaa qodobka aynu maanta ka hadleyno ee ilaalinta deegaanka iyo duur-joogta.

Inagu waxaynu ka soo galeynaa, sharcigii ilaalin lahaa oo aaney Wasaaraduhu isku qabsadeen, oo ku haboon dhinac walba hadey tahey deegaan iyo hadey

tahey Duur-joog labada ku haboonaan lahaa ilaalintooda ayaa laga rabaa Xeer-dejinta, fulinta waxaa laga rabaa inay markaa fuliso, garsoorkana waxaa laga rabaa cidii ku xad-gudubta sharciga inay xukunto, horta waa inaynu sidaa u kala fahanaa, oo inagu maaha inaynu Wasiiro ka hadalno ee waa inau xeer ka hadalnaa, hadey wasiiradu isqabasanayaana wixii kala ilaalin lahaa inaga la inaga rabaa oo golahan ayaa laga raabaa, maxaa ad hoc committee loogu saarayaa, yaan waxba loo saarine sharcigii maanta ayaynu gacanta ku heynaa, waa inaynu xeerka lagu deg-degin oo la saxar tiara.

Waxaa halkan laga ansixiyay oo aanu ilaa 1993kii ansixineynay xeerar ku saabsan, Beeraha, dhulka iyo biyaha iyo maamulka Gobolada iyo degmooyinka, intuba way ka hadlayaan Deegaanka, waxa weeye inagu waajibkeenu waa inaynu xeerarkaa maanta doonano oo iswaafajino, waajibkeenuna waa kaas, iyagu way iskaashanayaan oo qoloba dhinac bay ka soo galeysaa hawshii, markaa qaabkii ayna isugu qabsan laheyn ee isu kaashan lahaayeen waa inaynu xeer sharci ah u sameyno taas ayaa la inaga doonayaa, hadeynu inagu shaqadeenii gudan weyno oo waxaynu soo saarney iyo kan ay iminka soo saareyno ay is khilaafaan meynaan inagu fulintii jahwareerin, markaa yaynaa wadanka jaahwareerine waajibkeenii aynu ku dhaaraney gudano.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Aynu doonano Xeerkii Beeraha, Xeerkii Biyaha, Xeerkii Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka ha la doono, Xeerkii Deegaanka ee hore hadii lala akhriyay anigu waan isla eegay waxbey isku khilaafsan yihiin, intaa marka la isu keeno, marka xildhibaanadu ka doodaan, ha la isu keeno oo ha lala akhriyo Xeerarkaa, si aaney Wasaaraduhu isaga hor-iman Wasaaraduhu inagu aynu mideyno.

4. **Md. C/laahi Xuseen Cige (Blacki):-** Gudoomiyaha iyo Mudanayaasha waan salaamayaa, runtii hadal badan umaan bixin, waxaan soo jeedin lahaa Xeerkan iyo Xeerar badan oo kaleba in lawada akhriyo ad hoc Committeena loo saaro, tusaale hadaan tilmaamo **Qodobka 3$^{aad}$ F/2$^{aad}$** ee Xeerka waxay leedahay “waa inay daraasad cilmi baadhis ah ku sameysaa kheyraadka dabiiciga ah ee dalka saddexdii sanoba hal mar” waadna garan kartaa kheyraadka dabiiciga ah ee dalku inuu badan yahey oo ilaa afar Wasaaradooda ka shaqeeyaan.

**Qodobka 8$^{aad}$ F/7$^{aad}$** waxay leedahay “Lama Samayn (abuuri) karo aagag degaan (settlements) ama tuulooyin aan waafaqsanayn siyaasada guud ee dhulka ee Somaliland” taas laftigeedu waxay siineysaa in Wasaarado kale oo ka mid tahay arrimaha Gudaha iyo Hawlaha Guud oo shuruuc kale oo ay galayaan baa jira.

**Markaa waxaan soo jeedin lahaa:-**

- Sida Xildhibaanka hore sheegay Xeerarka kale iyo Wasaaradaha kale ee khuseeyo inta la soo qaado ad hoc Committeena loo saaro oo Xeerarka la soo waafajiyo Xeerkan.

5. **Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne:-** Gudoomiye, nin hangool doontey baa soo noqdey markaas ayaa la yidhi war maxaad hangoolkii u soo goysan weyday, wuxuu yidhi "waxaan arkey gadhkii inuu geed ku yaalo, markhaatigiina geed kale ku yaalo" markaa waxaa meeshii ka soo baxay inuu hangoolkii waayo, markaa Xeerkan aynu ka hadleyno iyo mawduucyo kaleba waxay ku xidhan yihiin, sida ugu haboon ee hadba loo sameeyo Wasaarad iyo hawleheed, Wasaarada Deegaanka waxaa laga soo gooyay Wasaarado kale, markii la soo goynayay looma soo goynin haboonaansho ee waxaa loo soo gooyay si siyaasad ah oo reer Walba Wasaarad helo ka dibna sidaa raali ku noqdaan, ilaa iminkana way socotaa.

   Waxaan ogsoonahay, Madaxweynuhu markii uu xilka fuuley, wuxuu yidhi dawlad yar oo kooban baan dhisaa, loo diid tiina oo waa taas intaas oo Wasaaradood sameeyay, markaa Waxa weeye meel badan baa la inaga hayaa, Wasaarad ama Wasaarada Deegaanka oo kale jid toosan u jeexno dib waxay inoogula noqoneysaa waxyaabo kale oo ina haya, iminka waxaa meeshii ka soo cad oo aad arkeysaa in loo baahan yahay wax alaale wixii xeer ah ee ku soo arrooraya ama ay dooneyso inay taabato in la tixgaliyo, markaa isla helimeyno.

   Markaa waxaynu u baahanahay inaynu dib isugu noqono Xeerarka hagaajino oo wixii is raaci karaya israacino, hadii kale waxba ma hagaajin karno inta hawleheenu ceynkaa yihiin, barigii hore waxaas oo dhan waxaa la isku odhan jirey kheyraadka dabiiciga ah (natural resource), kuna noqonmeyno dawlad hagaagsan in hadba Wasaarad aan jirin cid lagu maslaxo, markaa aynu dib isugu noqono.

6. **Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac-nac):-** Xildhibaanadu way salaaman yihiin, salaam ka dib, waxaan sheegayaa in dadkii iska oodan jirey dawladu ku baxday oo baabi'isey, duur-joogtii waxaan qabaa inay qabashadeedii yaraatey intii xukuumadni joogtey afarta sanadood saddex haram cad ayaa la soo qabtey iyagiina inta la qabtey ayaa halkoodii lagu celiyay, intii maamulkani jirey markaa way batey duur-joogtii.

Sidii xildhibaanadii hore sheegeen duur-joogta iyo keymaha aynu wax ka qabano, qolo walbana shaqadeeda aynu u sheegno, bari dhow deeradu waxay noqoneysa mid ku yar aduunka intaa yar aynu ilaashano, dadkii markii la yidhaahdo wada ka baxaysa meel way seeranayaan markaa taasna wax laga qabto ayaan leeyahay.

7. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** Gudoomiye iyo Mudanayaashaba waan salaamayaa, runtii kama gaadhsiin inaan dhamaan xeerka wada akhriyo, intii aan akhriyay ayaan dooda ku darsanayaa, Xeerkani wuxuu ka kooban yahay laba qeybood oo kala ah Ilaalinta Keymaha iyo Duur-joogta, asal waxay aheyd in Xeer loo sameeyo Duur-joogta oo ka duwan waayo nidaamkeeda, ilaalinteed iyo ciqaabaheeda iyo maamulkeeduba xeerkan kuma wada dhama, qeexitaankeeduna kuma dhama, sidaa darteed waxaa haboonaan laheyd in Xeerkan oo u badan ilaalinta keymuhu ay duur-joogtu u badato.

   Halkan waxaa ka muuqata in Xeerku yahay Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duur-joogta, marka ugu horeysa ee aad xeerka gudaha u sii gasho waa waajibaad iyo waxaas iyo waxaas ayay qabaneysaa, ilaalintii waxaad moodaa inaaney qodobada ka dhex muuqan.

   Hadaad eegto **Qodobka 3aad** ee hawlaha Wasaarada ku qoran, maaha hawlaha Wasaarada ee waa Waajibaadka Wasaaradu laheyd, waajibaadkeediina kama muuqato ilaalintii iney ruqsad1 iyo waxaas bixineyso mooyaane.

   Qodobka ugu horeeya ee macanaha ereyada la siinayo iyo ereygu waxaad moodaa inaaney isleheyn, tusaale ahaan "**Duur-joog"** marka hore waxbaa ku qoran, xagan qeexitaankana wax kale oo aan dhameystirneyn ayaa ku qoran, markaa waxay u baahneyd in la isla eego Macnaha ereyga duur-joog la odhanayo iyo halkan hore waxa ku qoran, waxaa la yidhi waa xayawaan kasta oo laf-dhabar leh ama aan laf-dhabar lahey, markaa ma qeexna waxay tahey Micnaha ereyga duur-joog.

   Waxaa kale oo la mid ah **"sarkaalka awood u leh"** iyana ma qeexna, "**Xayawaan"** iyana ma qeexna, waxaa kale oo aan qeexneyn "kaarboon furan" oo kalmada iyo hadalka ka horeeya aaney is laheyn, waxaa kale oo ku soo noq-noqotey sarkaal, sarkaalka sare, kuwaas oo u baahan in la kala qeex-qeexo si aan hadhow muran uga iman dhowr sarkaal marka halkan lagu qoro oo aan lakala sheegin.

   Sidoo kale **Qodobka 3aad** isna wuxuu u baahan yahay in la kala saaro awooda iyo waajibaadka Wasaarada Deegaanku u leedahay iyo awooda iyo waajibaadka

Wasaaradaha kale ku leeyihiin, waayo marka xeerka la eegayo waxaa soo galaya qeybo badan oo wasaaradaha ka mid ah sida Wasaarada Xanaanada Xoolaha oo kale oo dhul-daaqsimeedkii ay kaga hadlayaan, markaa in iyadana la eego oo awooda ay Wasaaradaha kale ku leeyihiin Xeerkan in lagu daro.

**F/12aad** ee isla qodobkaa ee soo saaris heerka cashuurta laga qaadayo kheyraadka dhirta baa ku qoran, cashuurta cidbaa qaada uu ku shaqo leh markaa Farqadaas 12aad waxaan u arkaa inay dheeraad ku tahey, waayo wasaaradu ma abuuri karto mana jideyn karto cashuur oo dawlada cidbaa uga masuul ah.

**Qodobka 4aad** isna wuxuu u baahan yahay dib u habeyn ah qaab-dhismeedka Gudiyada ee Heer Qaran, Heer Gobol, Heer Degmo iyo heer tuulo loo kala saarey qaabkey u dhismayaan waxaad moodaa in mugdi badan uu ku jiro oo way kala sareeyaan, qaabkey u kala sareeyaan iyo maamulka qaabka loo marayo iyana waxay u baahan tahay dib u habeyn weyn in qodobkaa lagu sameeyo.

**Qodobka 5aad** oo isaguna hawlaha Gudiyada ka warama oo aan qaab-dhimeedkoodiina aanu ka muuqan, Cutubka 3aad isna waxaa ku qoran ilaalinta keymaha, dhirta iyo dhulka daaqa, dabeecade kale iyo xeerarka kale ayay noqoneysaa in lala akhiryo sida Mudanayaashii iaga horeeyaya sheegeen, markaa waxay u baahan tahey in ama halkan laga saaro oo Wasaaraha loo refergareeyo ama la soo minguuriyo oo halkan dhirta iyo qaabka loo ilaalinayo xeerarka ee ay khuseyso lagaga soo daro sida Xeerkii Beeraha ee Law No. 08 oo la eego maxaa dhul-daaqsimeed ah maxaanse dhul-daaqsimeed aan aheyn, xataa Xeerkaa Beeraha seereyntu way ku jirtaa iyo qeybaha kala duwan ee kale ee la mid ka ah.

**Qodobka 7aad** wuxuu mamnuucayaa oo uu reebaya in dhirta la gooyo oo wuxuu leeyahay waa mamnuuc, hadana halkan kale wuxuu ku qorayaa in loo isticmaalo si sharciga waafaqsan, markaa labadaa uu mar mamnuucayo, marna uu leeyahay si sharci waafaqsan ha loo isticmaalo waxaad moodaa inay iska hor-imanayaan, markaa waa in xeerku dhigo sida loo isticmaayo dhirta si loo ogaad xaqaa isticmaalka xeerku dhigay hadaan loo isticmalo in dambi ka dhalanayo, sidaa darteed saddexdiisa farqadoodba waxay u baahan tahay in run ahaantii dib loogu noqdo.

**Qodobka 8aad** isna waa la mid oo Dhulka oodan ayuu ka hadlayaa, dhul oodan waxa loola jeedo erey bixinta kuma jirto, markaa waa maxay dhul oodan, sidoo kale waxaad moodaa in **F/1aad** iyo **F/2aad** ay iska hor-imanayaan, oo f/1aad waxay reebeysaa in dhul gaar ah la oodto, halka f/2aad ogolaaneyso in rusqad

loo qaato, awoodihii iyo waajibaadkii Wasaaradu laheyd baa iyana ku xusan **F/5aad** iyo **F/6aad** oo ay iyana aheyd in meel la isugu geeyo wixii waajibaad ah ee Wasaaradu leedahay iyo qaababkeed awoodaha sida hadey dhul bixineyso iyo hadey ruqsad dhul-daaqsimeed bixineysoba.

**Qodobka 9aad** *"Qof kasta oo dhul si sharci ah u leh ee ka beera dhir, waxa uu leeyahay wixii dheef ah ee dhirta dhulkaasi ka soo baxda, waxa uu dhirtaasi u isticmaali karaa sida uu doono"* cinwaankuna waa "dhir la beery" markaa waxaad moodaa inay cinwaanka iyo xaga hoose ay kala duwan tahay waxa ku qoran, waa khalad oo dariiq sharci Xeer aan kan aheyn baa jideeyay inuu beerto ama dhir ha ka beerto ama wax kale waayo cashuur beereed baa laga qaadaa oo cashuur keymeed loogama qaado.

halkan waxaad moodaa in intii keynta laga soo qaatey beertii oo dhan, markaa qofku ma xeerkan buu dhaqan galiyaa oo isticmaalaa mise kii Beeraha ayuu dhaqangaliyaa, hadii kale in dabro iyo isticmaalka qofka in dabro waxay noqoneyso, tusaale ahaan, hadii beertiisu keyn badan leedahay oo gubitaankeeda wax intii sharciga ka baxsan ay tahay waa in halkan lagu cadeeyo, laakiin beertiisii oo uu xaq u lahaa keyn ku dhextaala sabab halkan loogu tilmaamo iyadoo wax gaar ah aan la waajibineyn meesha ma taalo waxna faa'ideyn meyso, iney muran badan keento waa laga yaabaa.

**Qodobka 10aad** isna ma cada *"hadii loo arko"* baa ku qoran, markaa anigu waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo amar halkan oo la saaro Wasaarada inay goob cayiman u sameyso ilaalinta keymaha iyo dhirta iyo nabaad-guurka iman kara.

**Qodobka 12aad** "abuurida seerayaasha" iyana si yar oo kooban ayuu qodobkaasi u qoran yahey, mabd'a ahaan in la cadeeyo weeye inay jiriyaan Seerayaasha qaranku leeyahey oo wakhtiyada qaar dadka ka caagan oo aan la galin Karin, wakhtiyo dadka loo sii deyn karona leh.

**Qodobka 13aad** "abuurida seerayaal cusub" waxay aheyd in lakala hor-mariyo Qodobka 12aad iyo 13aad.

**Qodobka 12aad** "abuurida seerayaasha" iyana si yar oo kooban ayuu qodobkaasi u qoran yahey, mabd'a ahaan in la cadeeyo weeye inay jiriyaan Seerayaasha qaranku leeyahey oo wakhtiyada qaar dadka ka caagan oo aan la galin Karin, wakhtiyo dadka loo sii deyn karona leh.

**Qodobka 13aad** "abuurida seerayaal cusub" waxay aheyd in lakala hor-mariyo Qodobka 12aad iyo 13aad.

8. **Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** Gudoomiye iyo Mudanayaasha Sharafta leh waan idin salaamayaa, salaam ka dib, waxaa Golahan Sharaf u ah inuu xeerkan oo kale soo saaro, marka hore waxaan doonayaa inaan xasuusiyo xildhibaanada sharafta leh saddex xeer oo kani ka mid ahaa oo Gudidii aan ka mid ka ahaa ee Green caucus kuwada jirney soo sameeyeen, xeerka kowaad wuxuu ahaa xeerkii siyaasada deegaanka, anigu waxaan odhan lahaa habar-dugaag waxaa ka jooga dacawo, xamaatadiina waxaa ka jooga diin, waxaynu aragney gaadhi landrovel ah oo 60 diin saaran yihiin.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In la xoojiyo Wasaarada Deegaanka
- In la soo celiyo Seerayaashii oo la sameeyo Seerayaal
- In la soo celiyo seere celiyihii iyo seere ilaaliyayaashii jirijiey

**Opened: - 10:36 AM Maalintii 2aad ee Dooda 08/December/2014**

9. **Md. Baar Siciid Faarax:-** Gudoomiyaha iyo dhamaan xildhibaanadaba waansalamayaa xeerkani waa xeer mihiim ah oo in badan laga soo shaqeeyay wanan u mahad naqayaa cid kasta oo ka qayb qaadatay xeerkan waana xeer aad u mihiima oo ah dhamaan nolosheena.

**Qodobka 8aad F/4aad** ee odhanaysa waa in labada oo dood isku jiraan 200 oo talaabo waxaan ka dhigilaa in labada oo dood isku jiraan 100 talaabo, waxaa kale oo aan ku darilahaa waa inuu helaa magdhaw qofkii sharci dawladeed haystaa, **Qodobka 18aad** waa ku taala wixii xoolo ah iyo dadka cuna lama dabargoyn karo markaa hadii uu umada dhib u gaysanayo waan in la dilaa markaa anigu waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa meesha laga saaro ama waa in lagu daraa farqad odhanaysaa waa in loo fasax qaataa.

**Qodobka 4aad f/1aad** lama gubi karo xididadana loo ma saari karo dhirta Somaliland gudoomiye dadkeenu waa reer guuraa oo marba meesha uu roob ka da'o ayay tagaan markaa wadamada inala jaarka ah eek u hayaamaan iyana waa in dhirtooda la ilaayiyaa.

Mida kale ee aan intaa ku darayaa waxay ay tahay Gudidda la abuuray xilkeedu waa 5 sano waxaan leeyahay 5 sano wey badan tahay ee waxaan odhan lahaa in laga dhigo 2sano waayo dadku is badalka ayay jecelyihiin si aanay u noqon dad meesha kooto ku haysta waxaana meesha ku qoran waa la soo celin karaa taasna waxaan odhan lahaa yaan la soo celine qaar cusub

ha doorto ayaan odhan lahaa inta kale xeerka sidiisa ayaan ku qaatay Gudoomiye waad mahadsan tahay.

10. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** xeerkani inta aan isha soo mariyay waxaa uu u muuqdaa xeer si wanaagsan looga soo shaqeeyay hadii ay tahay gudidda, Kooxdii Green Cocas iyo Wasaaradaba waayo wax badan ka hadli maayo ee waxaa wax ka odhanayaa **Qodobka 3aad F/13aad** abuurista ciidanka kaymaha marka aan xeer abuurayno waxaan la akhriyaynaa xeerarka hore ee aan sii daynay sida xeerka ilaalinta deegaanka waayo waxaan ku abuurnay ciidan waxaan soo jeedinayaa in aynaan ciidan cusub abuurine in aan awooda siino ciidankaa hore ee aan ugu abuurnay Xeerkaa.

    Qodobka kale ee aan is leeyahay waa in lagu daraa waa in qofkasta oo muwaadin ka ah lagu waajibiyaa in uu ilaaliyo dhirta iyo Ugaadha waxaa kale oo qodobkaa kamaqan oo aan raacin lahaa dadka ku dhaqan miyiga oo ah meelaha badan ee dhirta laga gooyo xeerku waajibaad ma siinin gudiyada uu abuurayo iyo dadka uu abuurayo wada mogaalooyin ama tuulo hanoqoto ama magaalo ama gobol hanoqotee hadlkaa waxaan ku dari lahaa in dadka miyiga ku dhaqan in iyagana waa jibaad laga siiyo ilaalinta dhirta iyo Ugaadhaba waayo igaa jooga meesha dhirta laga jarayo ama ugaadha lagu laynayo.

    Sida aan ognahayna dadka khatarta ku ahina waa dadka magaalooyinka Dagan waayo dadka miyiga joogaa way yartahay inta ay wax gooyaan ama laayaan waayo inta ay xoolaha ku oodanayaan mooyaane, markaa waa in dadkaa nabad sugid looga dhigaa oo la yidhaa soo sheegay cida dhirta jaraysa oo qarkoodna lacag lagu siiyo si ay u ilaaliyaan.

11. **Md. Axmed Cabdi Nuur (kijaandhe):-** Gudoomiye aad ayaad u mahadsantahay, waxaan ku bilaabayaa **Qodobka 3aad** ee ah Hawlaha wasaarada run ahaantii **Qodobkaa 3aad** iyo **Qodobka 25aad** waxaad moodaa in ay isku dhawyihiin markaa waxay u baahanyihiin in la isku akhriyo labadaa qodob ayaan soo jeedinayaa. Takale waa jibaadka wasaarada waxaa kamaqan ayaan is idhi wixii ugu mihiimsanaa oo ah inay samayso siyaasadda, qorshaha deegaanka iyo duurjoogta iyo sidii loo fulinlahaa xeerkan waa intaa lagu daraa waayo weykamaqantahay.

    Runtii sida aan sheegnay xeerkani waa xeer aad iyo aad u mihiima waa hadii si wanaagsan loo sameeyo weeyaan waayo duurjoogtaa iyo Kaymuhuba wax aad u mihiima weeyaan wanaana laga yaabaa in uu rabshado keeno waxaana ka mida masalan waxaa la yidhi dhulna waxaa loo aqoonsanayaa dhul beereed dhulna waxaa loo aqoonsayaa dhul daaqsimeed anrinkaasi waa controversial wayo dhul aan beernoqon karini markaa arinkaasi waxaa u baahan yahay in aad looga fikiro sida loo samaynayo iyo sida loo qorshaynayaba, halkana waxaa ku yaala seerayaal dhawr nooca oo ay ka mid yihiin seasonal mid ah, mid joogto ah, mid forestry ah aad ayay u badan yihiin markaa kuwaasi waxayu baahan yihiin in lakala qeexo waxanan anigu soo jeedinayaa meesha seeraha

laha samaynayaa waa in noqotaa 100-150 mitir in marba inta la isla waafaqo layidhaa intaa seere halaga sameeyo ayaan soo jeedin lahaa.

**Qodobka 3aad f/11aad** waxaa ku taala abuurida tamar kale oo dhuxusha badasha waxaa kale oo iyana jirta wasaarad kale oo tamartaa iyo waxaa qaabilsan markaa halkaa waxaa ka iman kara khilaaf, markaa halkaa waxaan odhan lahaa in layidhaa waa in ay kala shaqaysaa, dhanka cashuuraha halkaa la yidhi iyadaa soo saaraysa waa in la yidhaa waa in ay kala shaqaysaa wadaarada maaliyadda.

Waxaa kale oo iyana ka maqan siyaaba loo samaynayo Gudiyada Deegaanka kumana taalo kaliya waxaa ku taala waajibaadkeeda yaa samaynaya ayaase awood u leh in la sameeyo waan in lagu daraa xeerkan.

**Qodobka 8aad F/3aad** waxaa uu sheegayaa dhul oodan anigu qodobkaa waxaa odhanlahaa in diblooqoro sobobta oo ah aad iyo aad loogama fikirin tusaale ahaan waxaa uu odhanayaa waxaa reeban in la ooto dhul daaqsimaad ama dhul 2 hegtar kabadan waayo waa labadali karaa markaa waxaan leeyahay halgu noqdo qodobkaas dhamaantiiba .

Dhanka kale dadku marba marka kadanbaysa wuu badanayaa oo dhulkii la iska daaqayay majiri doono ama xoolihii la iska foofinayay jiray ma jirayaan oo dadka iyo xooluhuba way badanayaan markaa waxaa khasaba in dadku dhul ootaan si xoolahooda wax ugu helaan waayo dadgka ayaa badanaya waana in lagu talo gala taas waayo siyaabo cusub oo xoolaha loo dhaqdo ayaa imandoonta ee waa in lagu talo galaa waayo sidana waa baro kicin waayo dadka la odhanayo ka kaca dhul daaqsimeed ayaad degteena ila ma haboona aniga taasi waayo hada hadaad eegto meesha uu geedweyn oo galoolihi ku beeran yahay waa meel dad oo teen oo kaliya.

**Qodobka 16aad** sidiisaba waxaa uu u egyahay siyaasad ee xeer maahan kaasina waxaa uu u baahanyahay in la hagaajo oo lagu noqdo ayuu u baahan yahay, xeerkana waxaa aad ugu faro badan waa in ciidamo la sameeyaa sida kuwo deegaan, ugaad, waana in la qeexaa dhanka kale tira koobka ugaadha guryaha ama magaalooyinka joogta waxaan filyaa in aynaan awoodeedii lahayn ayaan qabaa waana **Qodobka 18aad f/9aad** waxay odhanaysaa waa in la soo ururiyaa mudo 6bilood gudohood ah waxaanan leeyahay wakhtigan ma muuqato waanand mahadsantihiin.

**Dr Cali Yusuf:-** Qodob ayaan ku darayaa kii uu ka hadlay Xildhibaan kijandhe, xoolaha dhawr hab ayaa lagu dhaqaa tan hada aan ka hadlaynay waa dadka reer guuraaga ah meelaha ay ka hirgali karaan wax soo saar dheeraada in wax loo beero xoolaha oo la dajiyo xoolaha sidaa ayay wax soo saarkooda ama wax tarkoodu ku fiican yahay, sidaa owgeed maadaama oo uu wadan keena roobadku ku yaryahay meel walba suuro gal kama aha sidaa ayaa seerayaasha loo dhiiri galinayaa waayo faa'iidooyin badan ayay leeyihiin hadii aan dhulka qaarkii la oodin oo lawada daqo dhulku wuu nabaad

guurayaa sababtoo ah cawsku marka uu baxo waa in uu koro oo uu ubaxa daadiyo si uu mid kale uga soo baxo meesha waayo hadii intaanu bixin la wada daaqo dee waxba ka soo bixi maayan wuuna nabaad guurayaa oo roob kastaa haduu ku da'o waxba ka soo bixi maayaan.

Waxaa kale oo kamida in marka dhulkaa aan mudo la daaqin ay ka dhimanayaa shilinta iyo caalkuba waan faa'iidooyinka seerayaashu leeyihiin waana ta kaliya ee laga baxsado marka ay dhacaan abaaruhu markaa xeerkani aad iyo aad ayuu u mihiin yahay marka dhan walba laga eeyo mida kale xeerarkeenu wey sheegayaa dhulka aan beero noqon karin.

**Xidhitaankii Fadhiga (House Adjournment):-**

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaashii dooda isu diiwaangaliyay intaas ayay ku dhamaadeen, Xeerka Waxaa Golaha la horkeeni doonaa fadhiga sabtida, maalinta bari ahna waxaa la isku soo duba-ridayaa Hadal qoraalkii dooda iyo isku guridii Xeerka oo Hadal qoraalku soo sameynayaa inta ka horeysa, Gudiyaduna intaa ha ka soo shaqeeyaan xeerarka ay gacanta ku hayaan oo Golaha ha u soo gudbiyaan, Fadhigii maantuna sidaas ayuu ku xidhan yahay.

| Cawad Cali Maxamed | C/risaaq Siciid Ayaanle |
|---|---|
| Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada | Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI |
| ------------------------------------------------- | ----------------------------------------- |